SOOMAALIYA (XAALAD GAAR AH)

Soomaaliya waxa ay ku jirtaa xaalad gaar ah lix iyo toban sano oo xariir ah. Mudadda warbixinta, Dowlada Federaalka ah ee Soomaaliya (DFS) waxa ay gacanta ku heysay magaalo madaxdeeda Muqdisho. Dowlad goboleedyaduna waxa ay gacanta ku sii hayeen sida badan caasimdaha degaanadooda dalka oo dhan. Gobolka iskii isku magacaabay ee madaxa banaan ee Somaliland iyo Dowladda xubinta ka ah federaalka ee Puntland waxa ay gacanta ku sii hayeen amaanka iyo dhaqan galinta sharciga ee goboladooda. DFS waxa ay ku laheyd saameyn kooban wixii ka baxsan Muqdisho; Kooxda argagixisada ah ee Al-shabaab waxa ay sii waday haysashada iyo gacan ku heynta dhulka baadiyaha ah ee Dooxada Jubba ee bartamaha koofureed ee Soomaaliya, kaas oo ay u isticmaashay saldhig ahaan si ay weeraro uga fuliyaan dalka oo dhan, waxa ayna nafsad ahaantoodu ku lug lahaayeen tahriibinta iyo ka faa'iideysiga dadka. DFS waxa ay diirada saartay dhisidda awoodeeda iyo in ay ka ilaaliso weerarda Al-shabaab Muqdisho iyo xarumaha dowlada. Falaaganimada sii socotay ee Al-shabaab waxa ay sii ahayd caqabadda ugu weyn ee hortaagan awoodda dowladdu in ay si dhab ah wax uga qabato tahriibinta dadka. Dowladu waxa ay u laheyd awood kooban in ay wax ka qabato dambiyada intooda badan, oo uu ku jiro tahriibinta dadka, sidaa awgeed waxa ay muujisay dadaaal yar gobolada oo dhan dhinacyada dacwo ku soo oogista, ilaalinta iyo ka hor tagidda tahriibinta ka faa'iidaysiga dadka. Qaar k amid ciidamada hubeysan ee dowlada dhexe iyo gobolada si joogta ah looma siin mushaar, taas oo xadiday in dowladu si buuxda ay gacanta ugu hayso maamulka dhulkeeda iyo awooda ay u leedahay in ay qaado dadaalo looga hor tagayo tahriibinta. Ciidamada Boliiska Soomaaliya oo dhan waxaa ma laheyn awood baaritaan oo haboon oo ay wax uga qabtaan kiisaska la xariira tahriibinta. Inkasta oo la soo sheegay in ay soo hagaagtay sidii ay aheyd sanadkii hore, qaar saraakiisha Soomaalida waxaa ka maqnaa fahamka dambiyada tahriibinta khasabka ah, ka soo ay inta badan ku qasaan tahriibinta muhaajiriinta. Warbixino hore ayaa ku eedeeyay qaar ka mid ah saraakiisha dowlada goboleedyada in ay ka macaashaan kooxada waxa tahriibiya gudaha Soomaaliya.

DADAALADA XAKUUMADDA

Masuuliyiinta Somaliland iyo Puntland waxa ay sii wadeen dadaal kooban oo ay kula dagaalamayaan tahriibinta khasabka ah mudadda warbixinta ka hadleyso. Ololaha daba dheeraaday ee lagu wiiqayo Al-shabaab darteed iyo in laga abuuro sharci iyo kala dambeyn gudaha Soomaaliya awgeed, ciidamada amaanka iyo

saraakiisha garsoorku ma aanay heeysan shaqaale ku filan, ma aaney helin tabar ku filan iyo iyaga oo la'aa awood ay si wax ku ool ah ugu dhaqan galiyaan sharciga. Sharcigii ciqaabta ee ka horeeyay 1991dii (oo khuseeya heerarka dowlada dhexe iyo gobolada) waxa uu dambi ka dhigayaa ku shaqeeysiga khasabka ah, iyo qaar ka mid ah noocyada kale ee tahriibinta la xiriirta galmada. Qodobka 455 waxa uu dambi ka dhigayaa adoonsiga, isaga oo dusha ka saaraya dambiilayasha geysta falkan ciqaab u dhaxeysa shan ilaa 20 sano oo xarig ah. Qodobka 464 waxa uu dambi ka dhigayaa ku shaqeysiga khasabka ah, isaga oo dusha ka saaraya dambiilayaasha geysta falkan saaraya ciqaab lix bilood ilaa iyo shan sano oo xabsi ah. Qodobka 457 waxa uu dambi ka dhigayaa wareejinta, tuurida, hanashada ama heysashada qof, waxa uuna dambiilayaasha dusha ka saarayaa ciqaab sadex ilaa 12 sano oo xabsi ah. Dhamaan ciqaabahaas waa kuwo adag oo u dhigma dambiga. Qodobka 408(1) waxa uu dambi ka dhigayaa in dhilaysi lagu khasbo qof iyada oo loo marayo rabshado iyo handadaad, kaas oo eedeysanayaasha dambiyada lagu soo oogo dusha ka saaraya ciqaab dhan laba ilaa lix sano oo xabsi ah, Taas oo ku filan ilaa xad laakiin aan u dhigmin kuwa loo qoray dambiyadda kale ee culus sida kufsiga. Dastuurka ku meel gaarka ah waxa uu mamnuucayaa adoonsiga, madiidin ka dhigasho, tahriibinta khasabka ah, iyo ku shaqeeysiga khasabka ah sida ku xusan qodobka 14aad. Qodobka 29(6) ee dastuurka ku meel gaar ka ah waxa uu mamnuucayaa in caruurta loo isticmaalo iska horimaadyada hubeysan. Bishee Sebteemeber 2017 is maamulka goonidiisa u taagan ee Soomaaliland waxa ay ayiday sharci qabyo qoraal ah oo ku saabsan dadka tahriibinta looga faa'iideysto, kaasoo la sameeyay ka dib markii lala tashtay ururo caaalami ah; inkasta oo tiro wasaarado ah oo ay khuseeyso ay ay ayideen sharciga qabyo qoraalka ah, Baarlamaanka Somaliland ma aanay ansixin dhamaadkii xiliga warbixinta. Bishii Nofeember 2017 Puntland waxa ay ansixisay qaabka sharciga ka faa'iidaysiga tahriibinta dadka ka dib sadex sano oo la tashiyo ay la sameeysay ururo caalami ah. Qaab shaciyeedkan waxa uu ka koobnaa xeer ciqaabeed cusub iyo xeer habraac dambiyeed iyo sharci si gaar ah u mamnuucaya tahriibinta dadka looga faa'iideysto. Masuuliyiinta Puntland iyo Somaliland ma aanay soo gudbin warbixinta dadaalkooda ciidama amniga. Intii lagu jiray 2017kii Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed (CBS) ee hoos taga DFS ayaa la soo wariyay in ay baareen hal kiis oo u muuqday kiis Tahriibinta ka faa'iidaysiga dadka oo uu ku lug lahaa tahriibiye ka soo jeeda Koofurta Suudaan, laakiin ma aanay soo sheegin wax dacwad ku oogis ama dambi ku helid ah, sidoo kale 2016kii CBS waxa ay baareen hal kiis oo u muuqday tahriibin Khasab ah kaas oo ku guul dareeystay in uu horay ugu sii socdo habka garsoorka. Intii lagu jiray mudadii warbixintii hore, masuuliyiinta Puntland

waxa ay dacwad ku soo oogeen 23 kiis oo la xiriira tahriibinta caruurta, taasoo sadex ka mid ah ay ka dhalatay in xukun lagu rido iyo oo lagu qaado shan sano oo xabsi ah iyo ganaax dhan 1.6 malyan oo shilinka Soomaaliga ah ($ 2,780 dollar). Sii kastaba ha haatee marka loo eego sanadihii hore, ma jirin tirakoob faahfaahsan ee heer federal ama gobol ah ee baaritaanada la sameeyay, dacwad ku soo oogis ama xukun ku ridid kiisaska la xariiray tahriibinta khasabka ah. Wararka ku saabsan saraakiil lagu soo eedeeyay in qeyb ka ahaayeen fududeynta tahriibita galmada iyo ku shaqeeysiga waxa ay sii ahayd mid aan la ogeyn, dowladuna warbixin kama ay soo saarin dadaaladeeda baaritaanka, dacwad ku soo eegista, iyo xukun ku ridida wax saraakiil ah oo ku lug lahaa tahriibinta ama dhaqdhaqaaqyo dambi oo la xiriira tahriibinta intii lagu jiray mudadda warbixinta. Waxa ay ku guul dareeysatay in ay talaabo ka qaado saraakiisha milateriga iyaga oo si sharci daro ah u qorta una isticmaala caruur intii lagu jiray sanadka.

Gudiga heer wasaaradeed ah oo isku dhaf ah ee tahriibinta khasabka iyo dhuumaaleeysi ku gudbinta ayaa uga shaqeeyay dowlada dhexe xubinta isku duba ridda ka hortaga tahriibinta khasabka ah, kaas oo ay ku jireen wakiilo ka socday CBS ,Wasaaradda Aminga Gudaha, Wasaaradda Arimaha Dibada, Wasaaradda Garsoorka, Iyo Wasaaradda Gudaha iyo Arimaha Federaalka, waxaana hor kacayay xoghayaha joogtada ah ee Wasaaradda Gudaha iyo Arimaha Federaalka. Mudadii warbixinta ee kal hore, kooxda loo xil saaray waxa ay bilaabeen in ay sameeyaan qorshe wax qabad qaran oo ku saabsan dadaalada tahriibinta khasabka ah, laakiin ma aanay ka soo warbixin horumarka ay ka sameeyeen qorshahaa mudda warbixintan. Qeybta dambi baarista ee CBS waxa ka hwalgala 40 sarkaal oo ka hor tagta tahriibinta khasabka ah iyo dambiyadda abaabulan , laakiin sida laga soo xigtay urur caalami ah, kooxdaan marnaba ma aanay helin tababar la xariira sida looga hor tago tahriibinta khasabka ah. CBS ee kooxda ka hor taga tahriibinta khasabka ah iyo saraakiil ka socota ciidanka ilaalinta xeebaha ayaa ka qeyb qaatay tababaro kala duwan oo ah sida loo aqoonsado kiisaska la xariira tahriibinta Khasabka ah gooni ahaantooda waxaana hor kacayay laba urur oo caalami ah mudadda waxbixinta. Saraakiisha cadaaladda oo ka socday DFS ayaa sidoo kale ka qeyb qaatay aqoon isweydaarsi ku saabsan sida dacwad loogu soo oogo looguna helo kiisaska tahriibinta khasabka ah iyada sidoo kale uu qabtay urur caalami ah. Boliiska gobolka Puntland oo la kaashanaya hay'ad caalami ah ayaa u sameeyay laba tababar oo dhameeystir ah oo ku saabsan baaritaanka tahriibinta khasabka ah 42 askari intii lagu jiray mudadda warbixinta. Gudaha Puntland Gudiga ka hortaga tahriibinta khasabka ee heer gobol, oo la sameeyay Maarso 2013, ayaa hor kacayay, intii lagu jiray mudadda warbixintana waxa ay

sameeysay hab gudbineed oo isku duwa tahriibinta iyo arimaha la xariira muhaajiridda aan joogtada aheyn iyo in ay fududeeyaan qaab lagu siinay kaalmo toos ah dhibanayaasha tahriibinta khasabka ah, waxaa taas soo raaca abuuritaanka wacyi galin la xariirta arimahaa. Dowlada Somaliland waxa ay sameysay Hayadda Ka Hortagga Tahriibinta Dadka ee Somaliland intii lagu jiray 2016kii, oo ay ku jiraan wakiilo ka socda hay'adaha socdaalka, boliiska, ilaalada xeebaha, xafiiska xeer ilaaliyaha guud iyo wasaaradaha ganacsiga, maaliyadda iyo duulimaadka hawada rayidka ah. Hay'adda waxaa loo xil saaray isku dubaridka dadaalada looga hortagayo tahriibinta dadka oo ay ku jiraan diyaarinta sharciyo iyo aruurinta xog la xiriirta tahriibka, laakiin shaqadeedu waxa ay aheyd mid kooban.

Ma jirin hay'ad dowladeed oo leh hab nidaamsan oo lagu garto ama loogu gudbiyo dhibanayaasha tahriibinta khasabka ah adeegyada lagu ilaalinayo, waxa ayna dhamaantood ugu tiirsanaayeen si buuxda ururo caalami ah iyo NGOyada si ay kaalmo u siiyaan dhibanayaasha, oo ay ku jirto cunto, dhar, hoy, kaalmo xagga sharciga ah , daryeel caafimaad, la talin,iyo adeegyo dib ula madoobid.Tirakoobka dhibanayaasha tahriibinta khasabka ah ee Soomaaliya lama heli Karin; si kastaba ha ahaatee urur caalami ah ayaa soo sheegay in ay heleen soo gudbin adeeg 21 dhibane ee xagga tahriibka khasabka ah mudadda warbixinta. Sanadkii la soo dhaafay, masuuliyiinta Puntland waxa ay kala qeyb qaataan ururadda bulshada rayidka ah daryeelka 23 dhibane ee tahriibinta khasabka ah iyo qarsoodi ku safrinta; sidoo kale waxa ay gacan ka geysatay fududeynta in ay dib ugu noqdaan guryahooda 29 caruur ah oo dhibanayaal ah. Ku dhawaad dhamaadkii mudadda warbixinta, masuuliyiinta Puntland waxa ay sameeyeen oo ay howlgaliyeen qaab gudbin ee gobolka oo dhan ee dhibanayaasha tahriibinta khasabka ah, iyaga oo gacan ka helayay hay'ado caalami ah. Daryeelka dhibanayaashu ma aheyn mid haboon waxa uuna u kala duwanaa si weyn wadanka oo dhan. Marka laga soo tago heerka xarunta jawaab bixinta muhaajiriinta ee ururadda caalamig ah, dhibanayaashu waxa ay u lahaayeen galangal kooban adeegyada ilaalinta. Daryeel gaar ah, gaar ahaan caafimaadka maskaxda ayeeyna heli karin sida badan dhibanayaashu iyada oo ay ugu wacneyd iyada oo aanay jirin xirfadlayaal aqoon u leh ama ku takhasusay hawshaan. DFS ma aanay siinin wax nood ama mood ah ururada kaalmeeynaayay dhibanayaasha. Gudaha Puntland iyo Somaliland masuuliyiintu waxa ay siiyeen dhismayaal xarumaha la tacaala muhaajiriinta ee Boosaaso iyo Hargeysa, iyo xaaladaha qaar kharaj safar oo ay ugu laabtaan guryahooda. Intii lagu jiray mudadda warbixinta, DFS waxa ay fududeeysay dib u celint 24 Soomaali muhaajiriin ah oo rabay in ay ku laabtaan dalkooda kana soo

laabtaan Liibiya, iyada oo xoogaa taakulo ah laga helay UE. Waxaa taa sii raaca DFS oo gacan ka heleysa ururo caalami ah, ayaa siisay daryeel caafimaad muwaadiniinta la soo celiyay, masulliyiin kale oo ka tirsan dowlada federaalka ah ayaa siiyay kaalmo xagga maskaxda iyo bulshada ah. Ma jirin qaab sharci oo looga saaro Soomaaliya dhibanayaasha tahriibinta khasabka ah ee ajaaniitbta si looguna celiyo wadamadii ay ka yimaadeen oo ay kala kulmi karaan xaalad adag iyo aargoosad.

Masuuliyiinta Soomaaliya oo dhan waxa ay muujiyeen dadaal yar oo ay uga hortagayaan tahriibinta intii lagu jiray sanadka. Dowlad goboleedka Puntland, xubnaha gudiga ka hortaga tahriibinta khasabka ah waxa ay uga qeyb qaateen muddo sadax bilood ah idaacadaha iyo telefishinada olole dhaqdhaqaaq bulsho wacyi galin ay soo abaabushay hayad caalami ah si dadweynaha loo dareensiiyo arimaha la xariira tahriibinta khasabka ah, oo ay ku jirto sida loo ogaado, loona soo sheego kiiska la tuhmo ee tahriibinta khasabka ah; xubnaha gudiga ka hortaga tahriibinta khasabka ah ee Puntland ayaa ka qeyb qaatay qaar ka mid ah wararka iyo warbixin soo gudbinta intii uu socday barnaamijku, laakiin dowlad goboleedka Puntland ma aanay maalgalin barnaajimkaas. Kadib duulimaadkii hore ee looga keenay 11 Somali ah Liibiya, dowlada soomaalidu waxa ay isticmaashay warbaahinta bulshada iyo dhaqanka si ay u baahiyaan soo celinta ayna u muujiyaan khatarta ay leedahay tahriibinta iyo tacadiyada loo geeysto dhibanayaasha. Ma jirin hay'ad dowladeed oo siisay maaliyad hay'adaha kormeera shaqaalaha. Mana la shaqaaleeyn kormeerayaal fuliya sharciga shaqaalaha. Masuuliyiinta dalka oo dhan ma aanay sameyn dadaal la taaban karo oo lagu yareeynayo dalabka shaqaale xoog loogu shaqeeysto ama falalka ka ganacsiga galmada. Dowladu ma aanay siin tababro looga hortagayo tahriibinta shaqaalaheeda diblomaasiyiinta ah. Soomaliya qeyb kama aha Heshiiska QM 2000 ee heshiiska TIP.

Intii lagu jiray sanadka, waxaa jiray warbixino joogto ah in Xooga Dalka Soomaaliyeed (XDS) iyo maleeshiyaadka la ologa ah, maleeshiyaadka Ahlu Sunna Wal Jama, maleeshiyo qabiil, iyo Al-shabaab in ay si sharci daro ah u isticmaaleen caruur askar ah, iyada oo ka ugu dambeeya uu geeystay xadgudubyada intooda badan. Saraakiisha QM waxa ay diiwaan galiyeen qorashada iyo u isticmaalka in ka badan 2,100 caruur ah sanadkii 2017. Tirada caruurta la soo wariyay in ay isticmaaleen ama ay qorteen al-Shabaab ayaa aad kor ugu kacday mudadda warbixinta marka la barbar dhigo mudadii ka horeeysay, halka tirade la soo wariyay ee ay isticmaaleen ama ay qorteen XDS, ASWJ iyo maleeshiyaadka

qabaa'ilka ayaa hoos u dhacday. Tiro caruur ah oo aan la cadeyn ayaa sidoo kale la soo sheegay in ay u isticmaaleen wardoon ahaan Hayadda Qaranka ee Wardoonka iyo Amaanka. Caruurta laga helay unugyada XDS waxaa sida badan loo isticmaalay in ay qaadaan qalabka iyo adeegyo yar yar; si kastaba ha ahaatee waxaa jira warbixino aan la xaqiijin oo unugyada XDS oo u isticmaalaya in ay ka dagaalamaan safka hore gudaha Hirshabeelle, sidoo kale caruur askar ah oo ka soo goostay al-shabaab oo isla markiiba ka qeyb qaatay dagaal toos ah oo ay galeen ciidamo la garab ah dowlada. Ma jirin caruur la afduubtay oo la soo wariyay, la qortay ama ay isticmaaleen ciidamada nabad ilaalinta ee Howlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) intii lagu jiray sanadka.

Xaaladda amaanka oo aad u liidata iyo xayiraad xagga isu socodka ah ayaa hor istaagay warbixin faafaahsan oo ku saabsan caruurta la askareeyo intii lagu jiray sanadka. Gudaha 2017, al-Shabaab waxa ay sii waday in ay caruurta ka qeyb galiso iska hor imaadyada iyaga oo u qortay iyo ka qeyb qaadashada iska hor imaadyo toos ah, sida diyaarinta qaraxyada iyo qaadid aweeraro, waxaa taa soo raacay kaalin taageero sida qaadida rasaasta, biyaha, iyo cuntada, qaadida maleeshiyaadka dhaawacmay ama dhintay; soo uruurinta xogta; iyo in ay noqdaan ilaalo. Ururka argagixisadu waxa kale oo uu adoonsaday tira aan la cadeyn oo gabdho yar yar ah iyo iyaga oo uga faa'iidaystay adeegasho galmo. Al-Shabaab waxa ay sii wadeen in ay u dhacaan dugsiyadda, madarsooyinka, iyo masaajidada iyada oo u jeedadu tahay in ay caruur ka qortaan, meelaha baadiyaha ah ee gobolka Galmudug iyo meel kale, waxa ay argagixisadu ku khasbeen arday ay da'doodu tahay todoba jir in ay iska qoraan madarasaadka ay maamusho al-Shabaab, oo ay ku jiraan tababaro milateri iyo manaahij maskaxda looga dhaqayo.

Dowladu waxa ay sii waday in ay qorshihii wax qabad ee 2014 si ay u dhameeyso qorashada iyo u isticmaalka caruurta ee XDS, inkasta oo dadaalka in sidaa la sameeyo uu ahaa qabyo. Si kasta ha ahaatee, mudada warbixinta , XDS Unuga Badbaadinta Caruurta (UBC) ayaa soo wariyay in ay u sameeyeen tababaro saraakiil XDS iyo ciidamada diiwaan gashan ayna balaariyeen wacyi galinta goobaha ka baxsan Muqdishu ayna ku booqdeen XDS iyo unugyo xulufo la ah XDS shan goobood oo ku baahsan Koofur Galbeed, Hirshabeele iyo dowlad goboleedka Galmudug sidoo kale laba goobood oo kuu yaal Muqdisho iyo Gobolka Banaadir. Intii lagu jiray booqashooyinkaas, Unuga Badbaadinta Caruurtu waxa ay eegeen ugu yaraan qiyaastii 1,500 oo askari, waxa ayna uga warbixiyeen muhiimadda ay leedahay in laga hortago caruurta oo loo qorto ciidamada

amaanka; kuwaa waxa ay ka heleen 16 caruur ah waxa ayna u gudbiyeen DFS iyo QM si loo xanaaneeyo. Si kastaba ha ahaatee QM waxa ay sii waday warbixinta walaaca ay ka qabto xiritaanka iyo heynta qaar ka mid ah caruur lagu eedeeyay ciidamada dowladu in ay ka mid ahaayeen al-Shabaab gaar ahaan gudaha Puntland. Marka laga soo tago safarada kala shaandheeynta iyo tababarada , DFS waxa ay qaaday olole wacyi galin dadweyne, iyada oo QM ay gacan siineeyso, si loo faafiyo wacyi galin balaaran ee arimahah badbaadada caruurta iyo qaabkii caruurta looga saari lahaa iska hor imaadyada hubeysan. Waxa kale oo ay soo saartay xayeeysiin taleefishinadda iyo idaacadaha ee koofurta-bartamaha Soomaaliya si loo niyad jabiyo qorashada caruurta, waxa ay isugu yeertay fanaaniinta gudaha si loo sameeyo boorar iyo calaamado looga hortagaayo qorashada caruurta meelaha ku wareegsan Muqdisho, Puntland, Koofur Galbeed, Hirshabeelle , Galmudug iyo Jubbaland. Inta badan Soomaalida waxaa ka maqan warqad dhalasho, iyo maqnaashaha qaab diiwaan galin dhalasho oo abaabulan ama hab guud oo qorasho, in la cadeeyo eedeeymaha caruurta oo askar loo qorto waxa ay aheyd mid adag.

TILMAANTA GUUD EE TAHRIIBITA

Sida la soo wariyay shanti sano ee lasoo dhaafay, Soomaliya waa dal u ah il, loo sii maro iyo dal la'aado rag, haween iyo caruur loogeeystay ku shaqeysi khasab ah, tahriibin galmo. Wararka ku saabsan tahriibinta ee gudaha Soomaaliya waa mid ay aad u adagtahay in la helo ama la cadeeyo. Wadooyinka tahriibinta ee ku yaal wadanka gudihiisa ayaa gaar ahaan ah kuwo xaniban laakiin qiyas ahaan, Dhibanayaashu waxa ay inta badan ka yimaadaan gobolada koofurta iyo bartamaha Soomaaliya, iyagoo ku sii jeeda gobolada Puntland iyo Somaliland ee waqooyiga. Gudaha Somaliland haweenka ayaa ah kuwo soo qora iyo dulaal si loogu sii qaado dhibanayaasha Puntland, Djibouti, iyo Ethiopia iyada oo ujeedadu tahay in laga dhigto madiidin guryaha ama loo tahriibiyo galma ahaan. Inta badan dhibanayaashu waxa ay ka yimaadaan koofurta -bartamaha Soomaaliya, iyagoo halka ay ku sii jeedaan ay tahay Yurub (gaar ahaan Talyaaniga) Yeman, Wadamada Khaliija (gaar ahaa Sacuudi Carabiya), Koofur Afrika, iyo Kenya. Sadaxda xaduudaha la isga gudbo ee jidadka ay isticmaalaan kuwa wax tahriibiya waa : (1)koofur-bartamaha Soomaaliya oo u jeeda Yemen waxa ay maraan Puntland; (2) Soomaaliya ku sii jeeda Yurub waxa ay maraan Kenya ama Itoobiya iyaga oo u sii gudba Liibiya ama Masar; iyo (3)Soomaaliya oo u sii jeeda Koofur Afrika waxa

ay sii maraan Keenya iyo Tansaaniya. Jidka afaraad, ee ku sii jeeda Yurub waxaa la sii maraa Turkiga, waxa sidoo kale isticmaala kuwa wax tahriibiya, in kastoo ay tahay tiri yar iyada oo ay ugu wacan tahay iyadoo qaal ah. Inkastoo ay san jirin tiro lagu kalsoonan karo, DFS ayaa tilmaantay qiyaas ahaan, tira yar oo Soomaali ah ayaa gaara wadamadii ay ku sii jeedeen laakiin ku xayirma wadamadii marinka u sii ahaa. Al-shabaab waxa ay sii waday in ay fududeeyso dambiyada tahriibinta dadka, iyaga oo isticmaalaya indho sarcaad si ay uga qortaan dhibanayaasha koofurta-bartamaha Soomaaliya iyo Keenya iyaga oo markaana ku khasba adoonsi xagga galmada ah, kaalin kaalmo, iyo in ay guursadaan maleeshiyaadka al-Shabaab.

Mudada warbixinta, tiro sii kordheeysa ee dabaqada dhexe Soomaaliyeed iyo caruur aan lala socon ayaa dhibaato ka soo gaartay tahriibinta, inkasto Dadaka ku soo barakacay gudaha iyo dhalinyarada shaqo la'aanta ah ee u dhexeeysa 18-35 jir ayaa ah kuwa ugu nugul. Saboolnimo iyo awood li'ida in ay daryeel siiyaan dhamaan xubnaha qooyskooda darteed, qaar ka mid ah Soomaalida ayaa iyagoo ogol ku wareejiyaan masuuliyda caruurtooda dad ay wadaagaan xiriir dhalasho ama ay isku qabiil yihiin, qaar ka mid ah caruurtaas ayaa laga yaabaa in ay noqdaan dhibanayaal xoog loogu shaqeeysto ama loo tahriibiyo galmo ahaan. Iyada oo caruur badan ay ka shaqeeyaan gudaha guryahooda ama meheradaha qoyskooda, waxaa laga yaabaa in qaar caruurta ka mid ah lagu qasbo shaqooyinka beeraha, howlaha guriga, ilaalinta xoolaha, iibinta iyo xamaalida jaadka, jajabinta dhagxaha, ama howlaha dhismada. Iyado oo uu keenayo cadaadis in ay shaqo raadsadaan , dhalinyarada iyo haweenka ka shaqeeya meheradaha aan rasmiga aheyn ayaa ugu jira khatar sareeysa in Khasab lagu tahriibiyo. Waxaa taa raaca qaar ka mid ah qowmiyadaha laga tirada badanyahay ayaa waxaa sii socotay in ay sii wajahaan khatar weyn ee tahriibinta galmada iyo ku shaqeeysiga, sida ay sameeyaan dadka ku nool meelaha ay gacanta ku heyso al-Shabaab. Inkastoo ay gabaabsi uu yahay tirakoob lagu kalsoonana karo, Somaliland iyo Puntland waxaa sii socotay in ay qaabilaan qulqul muhaajiriin dhaqaalo doon ah iyo qaxooti ka yimid dalka dagaaladu aafeeyeen ee Yaman iyo gobolka Oromiya ee Itooniya. Ka faa'iidaysiga iyo rabshadaha ku saleeysan Jinsiga ee qaxootiga iyo xeryaha barakacayaasha ee Soomaaliya oo ay mararka qaar oo ay dhib ka geeystaan ilaalada gacanta ku haysa xeryaha, ayaa ah walaac sii socda , gaar ahaan ku badalashada raashin iyo adeeg ay ahayd in lagu helo bilaash; taasina waxa ay abuurtaa deyn soo noqnoqota iyo waxa ayna ka dhigtaa shaqsiyaadkaas kuwo u nugul in la tahriibiyo.

Sida laga soo xigtay urur caalami a , kuwa waxa tahriibiya waxa ay adeegsadaan xeelad sida badan qaabka ay ku soo qortaan, inkasta oo al-shabaab ay sida badan isticmaasho Khasab iyo xoog. Sida badan shabakadaha wax tahriibiya waxa ay ka koobanyihiin Soomaali, Jabuutiyaan,Eriteriyaan iyo tahriibiyayaal ka socoda Waqooyiga Afrika. Boliiska Soomalida ayaa la soo sheegay in ay baareen hal shabakad oo ay maamulaan tahriibiyayaal ka yimid Koofurta Suudaan intii lagu jiray mudadda warbixinta. Tiro soo kordheeysa oo tahriibiyayaal ah ayaa bartilmaameedsada oo qorta caruur, iyada oo aanay waalidkood ka war qabin ama aysan taageerin ama balanqaadyo been ah oo ah in aan wax lacag ah laga rabin ilaa ay ka gaaraan meesha ay u socdaan. Ku wax tahriibiya iyo kuwa dhuumaaleysiga dadka ku gudbiya ayaa la soo wariyay in ay ka faa'iideystaan nuglaashaha caruurta iyo haweenka ku jira xeryaha barakacayaasha kuwaa oo sida badan ka yimid koofurta iyo bartamaha Soomaaliya, maraka qaar iyaga oo isticmaalaya balan qaadyo been ah oo shaqooyiin macaash fiican leh ee Yurub iyo Waqooyiga Amerika. Kuwa wax tahriibiya waxa ay marsiiyaan mararka qaar haweenka Soomaalida Jabuuti, una sii gudbiyaan bariga dhexe, halkaas oo ay si joogta ah ugu mutaan madiidinimo guryaha ah ama iyaga oo lagu qasbo dhileysi. Raga Soomaalidu waxa ay la kulmaan xaalado xoog loogu shaqeysto sida qowsaarnimada xoolaha iyaga oo ka shaqeeya dowladaha Khaliijka. Kuwa khasabka wax ku tahriibiya waxa ay caruurta u qaadaan Sacuudi Carabiya iyo Jabuuti iyaga oo ku khasba in ay ka tuugsadaan dariiqyada. Hayado shaqo bixineed oo shaki ku jiro ayaa fududeeya tahriibinta dadka iyaga oo xulanaya dadka xiiseeynaya in ay u haajiraan wadamada khaliijka ama Yurub si ay uga shaqeeystaan. Masuuliyiinta Somaliland ayaa horay u soo wariyay kororka safrinta ama afduubka caruurta iyo kuwa ka soo qalinjabiyay jaamacadaha ee shaqo la'aanta ah, kuwaas oo dabadeed sii mara Itoobiya iyo Suudaan ayaa waxaa mararka qaar u heysta afduub shabakado ka jira Liibiya marka ay u sii jeedaan Yurub iyo Bariga Dhexe. Baabuurta xamuulka ee badeecadaha u kala gudbiya Kenya ilaa Soomaaliya ayaa mararka qaar ku soo laabta Keenya iyaga oo wada gabdho iyo haween; kuwa khasabka wax ku tahriibiya ayaa la wareega gabdhahaas yar yar iyo haweenkaas waxa ayna u soo keexeytaan guryaha dhilooyinka ee ku yaala Mombaasa iyo Naryoobi si ay uga faa'iideystaan ama waxa ay u diraan meelo ka baxsan Kenya. Dadka Itoobiyaanka ah ee aan waraaqha wadan ee ku sugan waqooyiga Soomaaliya ayaa ah kuwo u nugul kuwa khasabka wax ku tahriibiya marka ay shaqooyin ka raadsadaan Puntland iyo Somaliland si ay u maalgaliyaan safoorkooda xiga ee Bariga Dhexe. Caruurta

Itoobiyaanka ah ayaa u safra Somaliland iyaga oo raadsanaya shaqooyin, laakiin waxaa halkeedii lagu khasbaa in ay ka tuugsadaan wadooyinka.